Warbixin gaaban oo ku saabsan dugsiyada sare ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman 2013

Skolverket

Dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay (gymnasiesärskolan) waxay ardayda koritaanka maskaxdu dhimman tahay ka helaan aasaas wax kii bartaan tahayoo shaqo ku raadsadaan, si firfircoonna oga qaybqaataan nolosha bulshada. Waxay kaloo dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay ka helaan fursado ay horumariyaan shakhsiyadooda dadnimo.

Waxbarashadu waa in dhiirrigelisaa bulsha la dhaqanka iyo in ay horumariso awoodda ardaydu u yeelaneyso in ay keli ahaan iyo iyadoo la shaqeynaya dadka kale ay ka faa'iideystaan, si dheer u bartaan oo u isticmaalaan aqoonta ay waxbarashada la helaan. Sidaas awgeed waa in dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay ay noqdaan kuwo dalma arday walba si ardaydu ay ugu horumaraan sida ugu suurtagalka ah ee waafaqsan hadafka waxbarashada.



Barnaamijka dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay

Dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay waxay ka kooban labo barnaamij oo kala ah, barnaamij qaran iyo barnaamij qofeed. Barnaamijyada heerka qaran waxay kala yihiin

Barnaamijka arrimaha maamulka, ganacsifa iyo maamulka badeecadda

Ardaydu waxay helaan aqoon asaasi ah oo ku saabsan arrimaha maamulka, ganacsiga iyo badeecadda. Waxbarashadu waxay ardayda u diyaarisaa in ay tusaale ka shaqeeyaan hawlaha fudud ee maamulka, suuqgeynta iyo diiwaangelinta. Inta ay waxbarashada ku jiraan waxay horumariyaan dareenkooda adeeg-wanaagga iyo awood ay kula xiriiraan oo kula dhaqmaan macaamiisha.

Barnaamijka arrimaha farshaxanka

Waxay ardaydu heshaa aqoon asaasi ah oo ku saabsan arrimaha farshaxanka iyo qaababka cabbiridda hadalka. Waxay ardaydu kaga bartaan barnaamijkaan sidii ay xiriirkooda ugu muujin lahaayeen sawirro, ereyo iyo dhawaaq. Waxbarashada barnaamijku ma ahan mid aad xirfad loogu jaangooyey laakiin waa in uu ardayda u horseedaa in ay qaybqaataan mashruucyada farshaxanka iyo in ay sii wataan waxbarashadooda ama ku shaqeeyaan hawlaha farshaxanka. Aqoontu waxaa kaloo isticmaali karaa hawlaha dugsiyada barbaarinta iyo xarumaha xannaanada carruurta.

Barnaamijka guryaha, dhismayaasha iyo hawlaha wax dhisidda

Ardaydu waxay aqoon asaasi ah ka helaan arrimaha guryaha, dhismayaasha iyo waxdhisidda. Waxbarashadu waxay ardayda u diyaarisaa tusaale ahaan in ay ka shaqeeyaan dayactirka iyo daryeelka guryaha ama ka shaqaynta iyo daryeelka jardiinooyinka.

Barnaamijka dayactirka baabuurta iyo hawlaha badeecadda

Ardaydu waxay aqoon asaasi ah ka helaan arrimaha dayactirka baabuurta iyo hawlaha badeecadda. Waxbarashadu waxay ardayda u diyaarisaa tusaale ahaan in ay ka shaqeeyaan dayactirka baabuurta iyo mishinada, mayridda iyo dib u habaynta baabuurta ama wadidda gaadiidka badeecadda lagu guro. Inta ay waxbarashada ku jiraan waxay horumariyaan dareenkooda adeeg-wanaagga iyo awood ay kula xiriiraan oo kula dhaqmaan macaamiisha.

Barnaamijka farmada gacanta iyo waxsoosaarka

Ardaydu waxay aqoon asaasi ah ka helaan arrimaha ku saabsan taariikhda farsamada gacanta, qaababka farsamada gacanta iyo waxsoosaarka. Inta ay waxbarashada ku jiraan waxay ardaydu bartaan isticmaalka qalabka farsamada, qaababka farsamaynta iyo in ay horumariyaan aqoonta ay leeyihiin qalabka lagu isticmaalo qaybaha xirfadaha baarnaamijka.

Barnaamijka hoteelada, makhaayadaha iyo foornooyinka (moofooyinka)

Ardaydu waxay aqoon asaasi ah ka helaan hawlaha hoteelada, makhaayadaha iyo foornooyinka. Waxbarashadu waxay ardayda u diyaarisaa tusaale ahaan in ay ka shaqeeyaan badeecadda foornooyinka, nadaafadda cuntada, goglidda miisaska, cuntakarinta iyo adeegga hoteelada. Inta ay waxbarashada ku jiraan waxay horumariyaan dareenkooda adeeg-wanaagga iyo awood ay kula xiriiraan oo kula dhaqmaan macaamiisha.

Programmet för hälsa, vård och omsorg

Ardaydu waxay aqoon asaasi ah ka helaan arrimaha ku saabsan adeegga iyo daryeelka ee qaybaha xannaanada carruurta iyo daryeelka dadka. Waxbarashadu waxay ardayda u diyaarisaa tusaale ahaan in ay ka waxtarka cuntooyinka iyo caafimaadka, hawlaha daryeelka iyo xannaanaynta. Inta ay waxbarashada ku jiraan waxay horumariyaan dareenkooda adeeg-wanaagga iyo awood ay kula xiriiraan oo kula dhaqmaan dadka kale.

Barnaamijka arrimaha bulshada, dabeecadda iyo luuqadaha

Barnaamijkaan waxay ardaydu ku bartaan aqoonta bulshada iyo luuqadaha. Waxaa kaloo jira fursado ay ku sii kororsadaan ama isu diyaariyaan hawlaha warbaahinta iyo dabeecadda.

Barnaamijka kaymaha, dhulka bannaan iyo xayawaanka

Ardaydu waxay aqoon asaasi ah ka helaan Eleverna får grundläggande kunskaper inom natur, miljö och naturbruksteknik. Waxbarashadu waxay ardayda u diyaarisaa tusaale ahaan in ay ka shaqeeyaan dhulka aan dhisnayn, dhirta iyo in ay la shaqeeyaan xayawaanka. Inta ay waxbarashada ku jiraan waxay horumariyaan dareenkooda adeeg-wanaagga iyo awood ay kula xiriiraan oo kula dhaqmaan dadka kale.

Maaddooyinka

Barnaamijka qaranka oo dhammaystiran waxay ardaydu ku bartaan ilaa 2 500 dhibcood ee maaddooyin kala duwan. Waxaana jira maaddooyin ay dhammaan ardayda dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay ay ka bartaan. Waxaa ka mid ah af-Ingiriisiga, farshaxanka, taariikhda, isboortiga iyo caafimaadka, xisaabta, sayniska, cilmiga diimaha, aqoonta bulshada iyo af-Iswiidhishka ama af-Iwiidhishka ajnebiga loogu talagalay

Marka laga reebo maaddooyinka ay ardaydu wada dhigtaan, waxaa barnaamij walba ku jira maddooyin ay ardaydu wadadhigtaan, kuwaas oo ay bartaan dhammaan ardayda barnaamij walba. Waxayna siiyaan barnaamij walba astaan lagu garto. Intaas ka sokow, waxaa barnaamij walba ku jira maaddooyin si gaar ah loo sii xoojiyo. Ujeeddooyinka xoojinta maaddooyinkani waxa weeye in ay ardayda wax dheeraad ah ka bartaan xirfad ama maaddo.

Dhammaan maaddooyinka dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay waxay leeyihiin qorshe maaddo (ämnesplan). Qorshaha maaddadu wuxuu qeexaa waxa maaddada ama koorsadu ka kooban yihiin, waxa ardayda laga filaayo in yaqaaniin kolka ay dhammaystaan barashada maaddada. Waxaa waxbarashada arday waliba leeyahay wax doorasho u gaar ah. Dugsiga ayaana go'aan ka gaaraya koorsooyinka ay ardaydu ka dooraneyso baarnaamijka maaddo-doorashada, laakiin waxay dhammaan ardaydu xaq u leeyihiin in ay bartaan maaddooyinka isboortiga iyo caafimaadka , iyo aqoonta hoyga iyo macaamiisha.

Heerka shahaadooyinka

Barnaamijka qaranka waxaa maaddo walba marka dhammaysto lagu bixiyaa shahaado. Haddii imtixaanka lagu gudbo waxaa la isa siiyaa shahaadada E, D, C, B ama A. Shahaadada ugu sarraysa waa A, shahaadada ugu hooseysana waa E.

Qofka aan ka gudbin shuruudda shahaadada E, ma heli doono wax shahaado ah.

Shaqada duruusta dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay waxay muujisaa in ardaygu ka soo baxay shaqada dugsiga

Dhammaan ardayda dhigata barnaamijka qaranku waxay sameeyaan shaqada duruusta dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay (gymnasiesärskolearbete). Taasina waa in ay ka turjuntaa hadafka barnaamijka iyo waxbarashada ardayga.

Shaqada duruusta dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay waxaa lagu ogaadaa in ardaydu ka bixi karto shaqada duruusta maaddooyinka kala duwan. Sidaas awgeed, waxaa shaqada duruusta dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay la sameeyaa dhammaadka waxbarashada.

Macallinka ayaa qiimeeya shaqada duruusta dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay oo go'aan ka gaara in lagu gudbay iyo in kale. Haddii lagu gudbo shaqada duruusta dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay waxaa la helaa shahaadada E. Haddiise uusan gaarin ujeeddadii, macallinku ma bixiyo wax shahaado ah.

Waxbarasho goob shaqo

Micneha waxbarashada goobta shaqo (Arbetsplatsförlagt lärande, APL) waxa weeye in ardaygu uu wax ku barto goob shaqo oo aan dugsiga ahayn. Ardayga wax kub arta goob shaqo wuxuu helaa aqoon xirfadeed, wuxuuna ku bartaa dhaqanka xirfadaha oo kaga qayb noqdaa dadka goobta shaqada. Sidaas awgeed ayey waxbarashada goobaha shaqadu u yihiin qayb muhiim ah oo ka mid ah waxbarashada barnaamijka qaranka. Dhammaan ardayda barnaamijka qaranku waa in ay wax ku soo bartaan goob shaqo ugu yaraan 22 toddobaad.

Waxbarashada tababarka xirfadeed

Barnaamijska waxbarashada qaranka waxaa la dooran karaa waxbarashada tababarka xirfadeed. Kolkaa wuxuu qofka ku jira tababarku tegi doonaa goobo shaqo ugu yaraan xilliga waxbarashada barkiis. Waxbarashada tababarka xirfadeed wuxuu u dhigmaa waxbarashada lagu dhigto dugsiyada.

Barnaamijyada gaarka loo dooraan karo

Ardayda aan la socon karin waxbarashada barnaamijka qaranka waxay dooran karaan barnaamij gaar ah. Barnaamijyada gaarka ahi waxay ka kooban yihiin qaybaha maaddooyinka (ämnesområden) hoos ku:

- Hawlaha farshaxanka
- Aqoonta hoyga iyo macmiisha
- Isboortiga iyo caafimaadka
- Dabeecadda iyo deegaanka
- Qofka iyo bulshada
- Luuqadaha iyo xiriirka dadka

Waxaa intaa weheliya in ardaygu uu meel tababar u tegi karo haddii ay faa'iido ugu jirto.

Qayb walba oo maaddooyin waxay ka kooban tahay in ka badan hal maaddo. Qayb walba oo maaddooyin waxay leedahay qorshaha qaybaha maaddooyinka (ämnesområdesplan). Waxaa halkaa ku qeexan ujeeddada waxbarashada iyo hadafka laga leeyahay waxa ardaygu baranayo.

Meeshii shahaadada wuxuu macallinku fiirinayaa oo qiimeynayaa aqoonta ardayga oo ku salaysan shuruudda waxbrashada asaasiga ah iyo waxbarashooyinka la sii bartay. Sidaas ayuu macallinku u waafajinayaa shuruudaha waxa ardaygu kari karo. Barnaamijka gaarka loo doorto waxaa la isku dhinac wadi karaa barnaamijka qaranka iyo qaybaha maaddooyinka. Maamulaha dugsiga ayaa go'aan ka gaaraya maaddooyinka la isku qaadan karo.

Qorshe waxbarasho oo loogu talagalay arday walba

Arday walba oo dhigta dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay wuxuu leeyahay qorshe waxbarasho oo u gaar ah. Waxaa ku qoran qorshahaas warbixino ku saabsan

- Barnaamijka uu ardaydu dhigto
- Koorsooyinka iyo qaybaha maaddooyinka ardaygu barto
- Haddii barnaamijku yahay mid buuxa, mid dhiman ama mid la kordhiyey
- Koorsooyinka ku jira barnaamijka dhammaystiran
- Koorsooyinka aan ku jirin barnaamijka aan dhammaystirnayn
- Koorsooyinka ku jira barnaamijka la soo gaabiyey iyo maaddooyinka laga reebay.

Caddaynta dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay

Marka la dhammeysto waxbarashada barnaamijka qaranka iyo midda gaarka ah waxaa ardayda la siinaya caddaynta dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay. Waxaana ku qeexan aqoonta iyo waaya-aragnimada ardayga uu ka bartay dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay. Waxay ka kooban tahay warbixin ku saabsan

- barnaamijka
- qaybaha maaddooyinka ama koorsooyinka ardaygu soo bartay
- shahaadooyinka
- waxbarashada tababarka goobta shaqo iyo tababarka ardayga
- shaqada dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahaygymnasiesär-skolearbetet.

Barnaamijka soodhoweynta dugsiga sare

Ardayda dhammaysatay dugsiyada hoose waxay bilaabi karaan barnaamijka soodhoweynta xirfad-barashada, waxbarashada gaarka loo dooran karo iyo bandhigga luuqadda. Barnaamijka soodhoweyntu wuxuu ardayda aan haysan shahaado waxbarasho siinayaa furso cusub.

Xirfad-barashada

Xirfad-barashada waxaa loogu talagalay dhammaan dhallinyarada aan haysan shahaado ay ku geli karaan barnaamijyada xirfadaha. Waxaa ardayda la siinayaa waxbarasho ku salaysan xirfad si loogu fududeeyo in shaqo ku helaan ama waxbarasho ka sarreysa u sii wataan.

Waxbarasho gaar loo dooran karo

Waxbarashada gaarka loo dooran karo waxay ardayda u diyaarisaa waxbarasho kale ama suuqa shaqada. Waxaa waxbarashada lagu saleeyey baahida arday walba, waxaana loogu talagalay ardayda aan haysan shahaado ay ku galaan barnaamijka qaranka.

Bandhigga luuqadda

Bandhigga luuqadda waa waxbarasho af iswiidhish badan lagu barayo dhallinyarada dhowaan timid Sverige. Marka ardaydu dhammaysato waxbarashada bandhigga luudda, waxay bilaabi karaan waxbarasho kale, sida barnaamijka soodhoweynta.

Ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay ama dhaawac maskaxda ka gaaray

Waxbarashada dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay waxaa loo talagalay dhallinyarada dhammaysatay dugsiga hoose ama dugsiga hoose ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay oo aan awoodin in ay ka baxaan shuruudaha dugsiyada sare ee caadiga ah, taas oo ay ugu wacan tahay koritaanka maskaxda oo wax u dhiman tahay ama dhaawac maskaxda ka gaaray.

Haddaba si loo ogaado kooxda ardaydu ka tirsan yahay, wuxuu maamulka degmada ardaygu deggan yahay sameynayaa baaritaan ku saysan qiimeyn xagga waxbarashada, maanka, caafimaadka iyo bulshada ah. Baaritaankaasina wuxuu asaas u noqonayaa go'aanka maamulka degmadu ka gaarayo in ardaygu ka mid yahay kooxdaas iyo in kale.

Ardayda dugsiyada ee ardayda koritaanka maskaxdu dhiman tahay waxaa la siinayaa casharo dhan ugu yaraan 3 600 saac oo waxbarasho ah oo xiisaddiiba tahay 60 daqiiqo loona qaybiyey afar sannad-dugsiyeed. Hoggaanka dugsiga (maamulka degmada ama shirkad gaar ah) ayaa go'aan ka gaaraya tirada saacadaha waxbarashada koorso iyo qayb maaddo.

ISBN: 978-91-7559-005-9
Sawir: Michael McLain

Skolverket